Xarunta Daawada ee Allina - Northfield

Baaritaanka Maandooriyayaasha, Waxbarashada/Wacyi Gelinta.

Xarunta Daawada ee Allina - Northfield
1400 Jefferson Road
Northfield, MN 55057 507-663-9000

Bulshada Ay U Adeegaan:
Dhamaan Degmada Rice iyo degaanka ku dhowdhow

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
Dhamaan

Adeegga Ay Bixiyaan:
Baaritaanka Maandooriyayaasha, Waxbarashada/Wacyi Gelinta, Ka hortagga

Adeegga Bulshada ee Degmada Rice

Qiimeynta isticmaalka maandooriyayaasha ee Rule 25 waxaa lagu sameeyaa telefoonka xilligan COVID-19

Qiimeynta Caafimaadka ee Isticmaalka Maandooriyayaasha (Rule 25) ee dadka ka soo baxa shuruudaha ee deggan degmada.

Adeegga Bulshada ee Degmada Rice :
320 NW Third Street
Faribault, MN 55021
507-332-6266, 507-332-6247 (faakis)

Goobo kale oo dheraad ah (balan kaliya lagu yimaado) :
801 Washington Street, Northfield, MN 55057

Bulshada Ay U Adeegaan:
Degmada Rice

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
12 iyo wixii ka sareeya

Adeegga Ay Bixiyaan
Qiimeynta

Adeegga Bulshada Ee Degmada Rice - Adeegga Caafimaadka Dhimirka

Adeegga Caafimaadka Dhimirka ee Degmada Rice waxa ay bixiyaan Adeeg Barasho iyo Ka Hortag, Maareynta Xaaladaha Dhimirka Ee Dadka Waaweyn Iyo Caruurta, Adeegga Taageerada Bulshada, Daaweynta Cilmi Nafsiga Iyo Adeegga Gurmadka.

Adeegga Bulshada Ee Degmada Rice - Adeegga Caafimaadka Dhimirka
320 3rd Street NW Faribault, MN 5502
507-332-6115, 507-332-5932 (faakis)
1-800-422-1286 (Khadka Gurmadka ee 24-hour ee gurmadka degdegga ah ee badbaadada caruurta)
1-884-880-1574 (MAARC ee xaaladaha degdegga ah ee badbaadada dadka waaweyn)
507-744-5185 – Telefoonka Lonsdale
RCSocialServices@co.rice.mn.us - iimeyl

Goobo kale oo dheraad ah:
Northfield – 801 Washington Street, 507-645-3090

Barashada iyo Ka Hortagga
Shaqaalaha diiwaan gelinta ayaa dadka siiya macluumaadka iyo ku xiritaanka barnaamijyada Degmada Rice oo ka caawiya dadka codsiyada iyo maareynta barnaamijyada.
Maareynta Xaaladaha Dhimirka ee Dadka Waaweyn
Waxa dadka waaweyn ee qaba Cudurada Dhimirka ee ka soo baxa shuruudaha ay ka caawiyaan maareynta, yareynta cisbitaal u gelitaanka xanuunka dhimirka iyo in ay noqdaan kuwo madax banaan oo ku dhex nool bulshada. Adeegga ay qabtaan waxaa ka mid ah qiimeynta,ku xiritaanka iyo joogtenyta adeegga maareynta.

Taageerada Bulshada ee Maareynta Cudurada Dhimirka ee Dadka Waaweyn
- Kalkaalinta - In loo fidiyo Dadka qaba cudurada dhimirka adeegga kalkaalinta caafimaadka ee maareynta cudurka iyo yareynta isbitaal u dhigista cudurka. Waxa ay ogolaadaan dadka ay ku soo xiraan shaqaalaha Degmada Rice.
- Hoyga Saaxiibnimada (Friendship House), Xarunta Adeegga Cudurada Dhimirka - Goob isku xirta barnaamijyada adeegga madadaalada ee bulshada ee Dadka waaweyn ee qaba cudurada dhimirka si loo dajiyo xaaladooda caafimaadka, lagu xiro bulshada oo ay bartaan hab wanaagsan oo ay bulshada ugu dhex noolaan karaan. Shaqaalaha maamulaha goobtan ayaa ogolaada dadka ay u soo gudbiyaan shaqaalaha AMH.

Adeegga Gurmadka
Khadka Gurmadka dedegga ah ee xaaladaha dhimirka; Khad 24ka saac ah ee taageerada adeegga dadka qaba cudurada dhimirka; Xarunta gurmadka waxa ay bixisaa adeegga gurmadka

iyo dajinta ee goobaha dadka lagu hayo ee qaba baahida degdegga ah; Kooxda Guurguurta ee Gurmadka waxa ay adeeg u fidiyaan caruurta, dhalin yarada iyo dadka waaweyn ee qaba cudurada dhimirka. Kooxda Gurmadka ee Guurguurta waxa ay bixiyaan adeeg lacag la'aan ah ee dadka loogu qabto guryahooda iyo goobaha bulshada. 1-877-399-3040.

Maareynta Xaaladaha Caruurta Qaba Cudurada Dhimirka iyo Adeegga Taageerada Bulshada
Waalidka haysta ilmo leh baahi gaar ah waxaa laga yaabaa in ay doonayaan in laga caawio baahida gaarka ah ee ilmaha. Shaqaalaha cudurada dhimirka ee caruurta ayaa la shaqeeya qoysaska si ay u dajiyaan qorshe lagu ogaanayo oo wax looga qabanayo baahida caruurtooda. Qorshaha gurmadka waxaa ka mid noqon kara maareynta daaweynta iyo gurmadka,in lagu xiro qiimeynta isticmaalka maandooriyayaasha, gargaarka shaqo raadinta, iyo la talinta qofka ahaaneed iyo qoyska. Waxa ay kala shaqeynayaan qorshe dhameystiran oo ka caawinaya in ilmuhu farxad iyo baraare kula noolaado qoyska. Adeegani ma aha mid mudada dheer soconaya laakiin waa mid qoyska ka caawinaya isku xirka adeegga iyo qorshaha daaweynta. La xiriir shaqaalaha diiwaan gelinta 507-333-3773.

Taageerada Bulshada waxa ay bixiyaan adeeg waxbarasho iyo ka hortag oo ay ka mid yihiin xirfadaha la dhaqanka bulshada iyo sidii qofku si madax banaan noloshiisa u maareyn lahaa. Adeegga waa mid ku saleysan heerka koritaanka maskaxda ee ilmaha, baahida qoyska iyo helitaanka. Soo wax shaqaalaha diiwaan gelinta 507-333-3773.

Adeegga Daaweynta; ee Qof ahaaneed, guurka iyo qoyska ayaa loo fidinayaa dadka iyo qoysaska ay xaladooda dhaqaale darteed u baahan in laga caawiyo gargaarka ay u baahan yihiin. Dadka heysta ceymis ka bixiya kharashka waxaa lagu xiriiyaa hay'adaha bixiya adeegyadaas. La soo xiriir Mary Lynn ee 507-332-6237.

Adeegga Bulshada:
Degmada Rice

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
3-5, Dugsiyada hoose, Dhexe, Sare iyo Dadka Waaweyn

Adeegga Ay Bixiyaan:
Kulamo/Xaflado/Dhacdooyin; Kooxo kulma/La talin; Ku xiritaanka Adeegyada kale; Khadka gurmadka ee 24-saac; Adeegga dadka aan balamada laheyn; Waxbarasho/Wacyi gelin/Ka hortag; La talin qof ahaaneed; La talinta Qoyska; Ku booqashada qoysaska ee guryaha.

Adeegga Caafimaadka Dabeecadda ee Omada

Xarunta Bukaanka ee isticmaalka maandooriyayaasha waxa ay u adeegtaa dhalinyarada iyo dadka waaweyn.

Adeegyada ay bixiso Xarunta Caafimaadka Dabeecadda ee Omada waxaa ka mid ah qiimeyn guud oo ku saabsan heerka daryeelka caafimaadka , iyo sidoo kale barnaamij u gaar ah qofka si ay wax uga qabtaan baahida macmiilka iyo qoysaskooda. Waxa kale aan u fidinaa gargaarka ka hor iyo ka dib daaweynta bukaanka la dhigo xarunta.

Dhismaha Xarunta (Central Block Building)
Central 401 Division St, Suite B
Northfield, MN 55057
507-664-9407, 507-664-3862 (faakis)

Adeegga Bulshada:
Degmada Rice

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
14-73

Adeegga Ay Bixiyaan:
La Talinta (Qoys, Qof, Koox); Waxbarasho/Wacyi gelin; Ka hortag; Gargaarka Ka Soo Kabashada

Isbahaysiga HealthFinders

HealthFinders waxa ay adeegga caafimaad ee qof ahaaneed u fidiyaan caruurta, qaangaarka iyo dadka waaweyn iyaga oo ku bixiya af Ingiriisi iyo Isbaanish. Meelaha ay xoogga saaraan waxaa ka mid ah dhib soo gaaray qofka, isku buuqa, isla hadalka, iyo arrimaha la xiriira dabeecadda. Bukaanka u baahan la talinta waxaa lagu arkaa xarunta Northfield, Fairibault, iyo labada dugsi sare ee Northfield iyo Faribault

HealthFinders waxa ay bixisaa laba adeeg ee daaweynta iyo la talinta isticmaalka obiyood. Fadlan soo wac si aad balan u sameysato ama haddii aad qabtaan wax su'aalo ah.

Macluumaad dheeraad ah ama in aad qof ku soo xirto barnaamijka:

- Xarunta Northfield
    - 706 Division Street, Northfield, MN 55057
    - 507-646-8964

- Xarunta Faribault
    - 1415 Townsquare Ln, Faribault, MN 55021
    - 507-323-8100

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
Caruurta, qaangaarka iyo dadka waaweyn

Xarunta Fountain (Fountain Centers)

Macluumaad ku saabsan balamada XaruntaFountain mudada COVID-19, kala soo xiriir xafiiska 507-334-6413.

Waxa ay bixiyaan adeeg kala duwan oo la xiriira isticmaalka maandooriyayaasha iyo adeegga qabatinka oo ay ka mid yihiin fasalo waxbarasho ah, barnaamij degdeg ah oo bukaanka soo booqda xarunta, kuwa la dhigo xarunta, iyo daryeelka mudada dheer.

Xarumaha Fountain waxaa ka go'an in ay caawiyaan shaqsiyaadka iyo qoysaska dhibaatada kala kulma cabista khamriga iyo maandooriyayaasha kala duwan tan iyo 1974. Waxa ay bixiyaan adeeg kala duwan oo la xiriira isticmaalka maandooriyayaasha iyo adeegga qabatinka oo ay ka mid yihiin fasalo waxbarasho ah, barnaamij degdeg ah oo bukaanka soo booqda xarunta, kuwa la dhigo xarunta, iyo daryeelka mudada dheer. Qorshaha daaweynta waa mid qof kasta u gaar ah kuna saleysan baahida qofkaas si looga gaaro daaweynta iyo ka soo kabashada. Ixtiraamka sharafta qofka ayaa aasaas u ah mabda'a aan ku shaqeyno uguna aadeegno macaamiisheena. Kooxda Taageerada ka soo kabashada waxa ay ka jiraan xarun kasta si loo joogteeyo taageerada loo fidiyo dadka marka ay dhameystaan barnaamijyada daaweynta.

Goobaha:
Adeegga oo loo soo bandhigay goobaha laga bixiyo

Albert Lea
408 West Fountain Street
Albert Lea, MN 56007
1-800-533-1616
507-377-6411

Austin
101 14th Street NW
Austin, MN 55912
507-434-1890, 507-434-1833 (faakis)

Fairmont
828 N. North Avenue

Fairmont, MN 56301
507-238-4382

Faribault
2301 4th Street NW
Faribault, MN 55021
507-334-6413

Mankato
1400 Madison Ave., Ste. 326
Mankato, MN 56001
507-625-3372

Owatonna
134 Southview Street
Owatonna, MN 55060
507-451-0511

Rochester
4122 18th Avenue NW
Rochester, MN 55901
507-252-0818

Bulshada Ay U Adeegaan:
Dhamaan Degmada Rice iyo Koonfurta Minnesota

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
Adeegga daaweynta ee 18+ iyo qiimeynta da'da 13+

Adeegga Ay Bixyaan
La Talinta - Qoys, Qof, Koox, Waxbarasho/Wacyi gelin, Kulamada Kooxaha

Xarunta Fernbrook (Fernbrook Family Center, Inc.)

Waxbarasho/Wacyi gelin; Ka hortag, La Talin - Qof, Qoys, Guriga, Kulanka kooxaha/La talinta Koox ahaneed; Isku buuq, welwel, Aamusiye (Autism)

Xarunta Fernbrook (Fernbrook Family Center, Inc.)
410 Central Ave N
Faribault MN 55021
507-331-3454, 651-925-0337 (faakis)

Ka caawiya qoysaska caruurta dhibaatooyinka soo wajaha. Adeegga Daaweynta ee Caruurta Da'da Macaamiisha

Adeegga Bulshada:
Degmada Rice

Ay U Adeegaan:
Da' kasta

Adeegga Ay Bixiyaan:
Waxbarasho/Wacyi gelin; Ka hortag, La Talin - Qof, Qoys, Guriga, Kulanka kooxaha/La talinta Koox ahaneed; Isku buuq, welwel, Aamusiye (Autism)

Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Rice

Waxa Ay Ku Xiraan Hay'Adaha Joojinta Cabista Sigaarka Iyo Waxbarashada La Xiriirta. Waxa kale oo qoysaska u fidiyaan kalkaaliye caafimaad oo ku soo booqanaya guriga waalidiinta una fidiya adeegga waxbarashada caafimaadka/xoojinta Ewaalidiinta/xiriirka ilmaha iyo qoyska iyaga oo xoogga saara ilmaha da'doou tahay 5 jir iyo ka yar.

Caafimaadka Dadweynaha ee Degmada Rice
320 Third Street NW, Ste. 1
Faribault, MN 55021
507-332-6111, 507-332-5932 (faakis)
Iimeyl: dpurfeerst@co.rice.mn.us

Bulshada Ay U Adeegaan:
Dhamaan Degmada Rice

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
Da' kasta

Adeegga Ay Bixiyaan:
Joojinta Cabista sigaarka, Adeega Booqashada ee Qoyska

Adeegga Dabeecadda ee Fairview

Waxaa ay dhawr goobood ku bixiyaan adeegga qofka iyo qoyska. Adeegga waa mid lagu bixiyo isbitaalka iyo xarumaha caafimaadka. Waxa kale oo xarumaha ay ku bixiyaan adeegga

daaweynta cilmi nafsiga ee caruurta, dhalinyarada, iyo dadka waaweyn iyo kuwa da'da ah ee goobo kale duwan ee degaanka. Waxa kale oo ay bixyaan adeeg dheeraad ah ee Dadka Waaweyn ee ka Soo Kabanaya Maandooriyayaasha.

- Bukaanka la dhigo xarumaha, kuwa dibadda kala socda; Barnaamijyada Lamaanaha ah ee Baaritaanka.
- Baaritaanka Lamaanaha ee Bukaanka Dibadda Kala Socda iyo Barnaamijka Qiimeynta ee Dhalinyarada.
- Bukaanka la dajiyo Lodging Plus: Minneapolis for adults (Xarunta Dadka Waaweyn ee Minneapolis); Chisago City for adolescents (Xarunta Dhalinyarada ee Chisago).
- Xarumaha bukaanku dibadda kala socdo waxa ay ku yaalan: Burnsville, Crystal, Edina, Elk River, Forest Lake, Maplewood, and Minneapolis.

Bulshada Ay U Adeegaan:
Degmooyinka Chisago, Dakota, Hennepin, Washington, Sherburne & Ramsey

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
Barnaamijyada-Riverside waxa ay u adeegaan 4 – dadka waaweyn.
Barnaamijyada OP ee dhalinyarada da'doodu u dhaxeyso 12-19.
Dhamaan xarumaha heysta leesinka DHS ee Qiimeynta (Rule 31) iyo barnaamijyada Qiimeynta ee (Rule 2960) way sameyn karaan qiimeynta baaritaanka maandooriyayaasha (Rule 25)

Adeegga Ay Bixiyaan:

La Talinta - Qoyska. Qof, Koox, Baaritaanka Maandooriyayaasha, Wacyi gelin/Wacyi gelin, Gargaarka ka soo Kabashada, Taageerada Kooxaha, Gurmadka Degdegga ah.

Allina Health - Xarunta Faribault

Waxa ay bixiyaan "gargaar" la xiriira qiimeynta iyo ku xiritaanka, iyo sidoo kale mid qof iyo qoys ahaaneed ee la talinta iyo ka fogaashaha isticmaalka maandooriyayaasha.

Allina Health - Xarunta Faribault
100 State Avenue
Faribault, MN 55021
507-334-3921

Bulshada Ay U Adeegaan:
Dhamaan Degmada Rice

Da'da Macaamiisha Ay U Adeegaan:
8–Dadka waaweyn (Da'da 5-8 ee ADD, ADHD kaliya)

Adeegga Ay Bixiyaan:
Dhakhaatiirta, Dhakhaatiirta Takhasuska, La Talinta – Qoyska iyo Qofka, Baaritaanka Maandooriyayaasha, Wacyi Gelinta Waxbarashada, Ku xiritaanka Bukaanka Isbitaalka La dhigo, Ka hortagga, iyo Taageerada Ka soo kabashada.

Abria Recovery

Abria Recovery
13401 County Road 5
Burnsville, MN 55337
Xafiiska: (952) 406 - 8105
Faakis: (952) 446 - 7273
Bogga Internetka: https://www.abriarecovery.com/

Abria Recovery waa Barnaamij Degdeg oo bukaan dibad joog ah (IOP) oo adeegsada isku dhafta habka Daaweynta Cilmiga ku dhisan dhamaan barnaamijyadeena. Waxaa la dhaqangeliyaa hab guud oo dhaqanku dhextaal u yahay si wax looga qabto baahida dhaqan iyo bulsho ee bulshada kala duwan ee dariiqa ay ku gaari karaan ka soo kabashada iyo nolol deggan. Hadafka Abria Recovery waa in ay caawiso shaqsiyaadka doonaya in ay ka fogaadaan oo bilaabaan nolol ka madax banaan cabitaanka khamriga iyo maandooriyayaasha.

Bukaanka noo ah bar tilmaameedka laakiin aan ku koobneyn waxaa ka mid ah kooxaha soo socda:

- Bukaanka aan isbitaal la dhigin oo rag iyo duamar leh, da'da 18-99.
- Macaamiisheena waxaa ka mid ah dadka soo haajira/qaxootiga, Afrikaanka, Hisbaanigga/Latino, Caddaan, Afrikan Ameerikan, Mareykanka dhulka loogu yimid, Eeshiyaan, dadka qaba HIV/AIDS, LGTBQIA, dadka jirka iyo maskaxda naafada ka ah, iyo dib jirka.

Waxaa jira barnaamijyo maalintii iyo fiidkiiba. Qoyska oo ka qeyb qaata daaweynta ayaa aad loo dhiirigeliyaa iyada adeeg waxbarasho qoyska loo fidiyo. Waxaanu dooneynaa in daweyntu noqoto mid uu qof kasta heli karo. Khadka baska ee MVTA ee 444 ayaa xafiiskeena hor mara. Basasku waxa ay maraan 30 daqiiqo oo kasta. Waxa aad heli kartaan goob gaadiidka la dhigto ee dhismaha iyo gaadiid qaada macaamiisha u baahan.

Adeegga waxaa ka mid ah:

1) Heerka 1: Daaweynta bukaanka dibadda kala socda (OT)
2) Heerka 2: Daaweynta bukaanka dibadda kala socda oo degdeg ah (OT)
3) Hababka daaweynta Wada-Socda
4) Qiimeyn Guud ee Isticmaalka Maandooriyayaasha iyo Khamriga ee (Rule 25)
5) Daaweyn Qofka U Gaar Ah
6) Daaweyn Qoyska Oo Dhan

7) Qorsheynta Daaweynta Ee Koox Ahaaneed
8) Baaritaanka Khamriga Jirka Ku Jira
9) Taageerada ka soo Kabashada ka dib
10) Taageerada Saaxiibada ee Joogteynta Daryeelka
11) Xiriirinta Joogteynta Daryeelka
12) Qorshaha Qof Ahaaneed ee Ka Hortagga Ku Noqoshahada Balwadda
13) Wadidda Gaariga ee Taxadarka Ku Dhisan (Fasalada DWI)
14) Isku Daweynta Cirbadaha ee Balwadda, Isku Buuqa & Dhaawaca Madaxa
15) Maareynta Carada (xanaaqa)
16) Maareynta dhaawaca madaxa